

Qof walbo oo yaqiinsan in isaga ama iyada laga saaray ka-qaybgalka ama loo diiday dheefaha barnaamijyada, hawlahaa, ama adeegyada RTD-da sababo la xiriira takoorka ku salaysan jinsiyadda, midabka ama waddanka uu ka soo jeedo wuxuu soo gudbin karaa cabashadan Title VI oo ay lasocoto RTD.

Cabashadu waa in lagu soo xareeyaa 180 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda takoor ku eedeynta. RTD-du waxay ogolanaysaa isticmaalka wakiilka si uu u xareeyo cabasho isagoo matalaya qofka ashtakoonaya. Dhammaan xiriirka ka dambeeyaa cabashada waxa lagu toosin doonaa wakiilka cabashada ugu horeyn kadibna ashtakoodaha marka labaad.

Marka cabashada la xareeyo, RTD-da waxay dib u eegi doontaa cabashada oo waxay go'aamin doontaa haddii aan awood u leenahay inaan sameyno xukunka. Macmiilku waxuu heli doonaa warqad qirasho ah oo ku wargelinaysa in cabashada ay RTD baari doonto gudaha todoba (7) maalmood ee shaqada laga bilaabo marka cabashada la xareeyay. Hadi aysan ka ahayn in wakhti dheer ay qeexo RTD mooyaane, ashtakooduhu waxuu haysan doonaa tobant (10) maalmood laga bilaabo taariikhda warqadda si uu ugu diro maclumaadka la codsaday baaraha RTD ee loo xilsaray kiiska.

Baaruuhu waxa uu waraysan karaa qof kasta oo lagu magac dhabo inuu yahay marqaati ahaan iyo cid kasta oo kale oo xog hayn karta. Haddii maclumaad dheeraad ah loo baahdo si kiiska loo xalliyo, RTD waxay la xiriiri kartaa ashtakoodaha ama markhaatiga. Haddii baaraha RTD aanu la xiriirin ashtakoodaha ama aanu ku helin maclumaadka dheeraadka ah ee wakhtiga loo baahan yahay gudahood, RTD waxa laga yaabaa inay maamul ahaan xирto kiiska. Kiisku sidoo kale waxaa laga yaabaa in loo xiro hab maamuleed haddii dacwooduhu/ashtakooduhu aanu doonayn inuu sii wado kiiskooda.

RTD waxay guud ahaan ku dhamaystiri doontaabaaritaanka lixdan (60) maalmood gudahooda laga soo bilaabo helista foomka cabashada ee la buuxiyay. In kastoo RTD ay ku dadaalayso inay si degdeg ah u xalliso cabashooyinka, habraacani wuu kala duwanaan doonaa iyadoo ku xiran kakanaanta cabashada, shakhsiyaadka ku lugta leh, iyo arrimo kale. Markabaaritaanka la soo gabagabeeyo, ashtakooduhu wuxuu heli doonaa warqadda jawaabta ugu dambeysa ee cabashada.

Haddii ashtakooduhu/dacwooduhu uu khilaafu go'aanka RTD, waxay codsan karaan dib-u-eegis iyagoo codsi qoraal ah ugu soo gudbinaya Maareeyaha Sinaanta Safrinta ee RTD (Transit Equity Manager) toddobo (7) maalmood gudahooda ka dib taariikhda warqadda RTD, iyagoo si gaar ah u sheegaya gundhigiyada aasaasiga ee dib u eegista. Maareeyaha Sinaanta ee Safrinta ayaa ku wargelin doona ashtakoodaha go'aankooda ay ku aqbaleen ama ay ku diideen codsiga dib u eegista tobant (10) maalmood gudahood. Kiisaska dib-u-eegida la ogolaado, Maareeyaha Sinaanta ee Safrinta ayaa gudoon siin doona ashtakoodaha/dacwoodaha warqada go'aan ka gaarista marka la dhammeeyo dib u eegista dib-u-hubinta.

# Title VI (Cinwaanka VI) Foomka Cabashada



**Title VI (Ciwaanka VI) ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 waxa uu dhigayaa "Ma jiro qof jooga Mareekanka oo, isir, midab ama wadanka uu u dhashay, lagaga saari karo, ka qaybqaadashada, loo diidi karo dheefaha, ama laguma takoori karo mid kasta barnaamijka ama hawlaho lagu helo kaalmada maaliyadeed ee federaalka."**

Fadlan ku buuxi macluumaadka soo socda ee lagama maarmaanka u ah si loo hawl-galiyi cabashadaada. Kaalmo ayaa la heli karaa marka la codsado. Buuxi foomkan oo boosto ugu dir ama gee:

**Regional Transportation District, Transit Equity Office, 1660 Blake Street BLK-31, Denver, CO 80202.**  
Waxaad kala xiriiri kartaa xafiiskeena Isninta-Jimcaha 8-5 lambarka 303-299-6000, ama waxaad iimayl ahaan ugu diri kartaa xafiiskeena titlevicomplaints@rtd-denver.com.

**1.** Magaca qofka Cabanayo: \_\_\_\_\_

**2.** Cinwaanka: \_\_\_\_\_

**3.** Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

**4.** Lambarka taleefoonka (Guriga): \_\_\_\_\_ (Ganacs): \_\_\_\_\_

**5.** Qofka la takooray (haddii uusan ahayn qofka cabanaya)

Magaca: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

**6.** Maxuu ku salaysnaa takoorka? (Sax dhammaan kuwa khuseeya)

Isir       Midab       Wadan uu udhashay

**7.** Taariikhda dhacdada keentay takoorka: \_\_\_\_\_

**8.** Sharaxaad ka bixi sida laguu takooray. Maxaa dhacay yaana masuul ka ahaa? Wixii ah meel bannaan oo dheeraad ah, ku dheji xaashida dheeraad ag ee la isticmaalay gadaasha foomka.

**9.** Waa maxay wakiilada RTD ay ku lug lahaayeen?

**10.** Halkee ayay ka dhacday dhacdada? Fadlan qor goobta, lambarka baska, magaca darawalka, iwm.

# Title VI (Cinwaanka VI) Foomka Cabashada (bogga 2)



11. Makhraati muu jiraa? Fadlan qor xogta lagula xiriiri karo.

Magaca: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

Lambarka Taleefanka: (Guriga) \_\_\_\_\_ (Ganacsi): \_\_\_\_\_

limayl: \_\_\_\_\_

Magaca: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

Lambarka Taleefanka: (Guriga) \_\_\_\_\_ (Ganacsi): \_\_\_\_\_

limayl: \_\_\_\_\_

Magaca: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

Lambarka Taleefanka: (Guriga) \_\_\_\_\_ (Ganacsi): \_\_\_\_\_

limayl: \_\_\_\_\_

12. Cabashadan ma u gudbisay golo kale oo ah federaal, gobol, ama wakaalad deegaanka; ama maxkamad federaal ama gobolka?

(Hubi meesha ku habboonee aad ku qori kartid) \_\_\_\_Haa \_\_\_\_Maya

Hadday jawaabtu haa tahay, sax cabashada wakaalad kasta oo loo gudbiyay:

- |  |  |   |
|--|--|---|
| <input type="checkbox"/> Wakaalad Federaal | <input type="checkbox"/> Maxkamad Federaal | <input type="checkbox"/> Wakaalad Gobol |
| <input type="checkbox"/> Maxkamad Gobol    | <input type="checkbox"/> Wakaalad Deegaan  | <input type="checkbox"/> Mid kale       |

13. Qor macluumaadka qofka lagala xiriiri karo wakaaladda aad sidoo kale u gudbisay cabashada:

Magaca: \_\_\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_

Magaalo: \_\_\_\_\_ Gobal: \_\_\_\_\_ Zip Koodh: \_\_\_\_\_

Taariikhda La gudbiyay: \_\_\_\_\_

---

Ka saxiix cabashada qaybta bannaan oo hoose ah. Ku lifaaq dukumeenti kasta oo aad aaminsan tahay inay kaalmaynayaan cabashadaada.